



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA

HESHIIS

KU SAABSAN

XALLINTA KHILAAFAADKA & TABASHOYINKA KA JIRA
BULSHOOYINKA DHAQAMEED EE GOBOLLADA
HIIRAN IYO SHABEELLADA DHEXE

Tixraac: (a) Mooshinka ku taariikhsan 11/04/2016
(b) Warqadda Xafiiska R/Wasaaraha OPM/00000.287/04/2016 ee 19/04/2016

Muqdisho, 23^{ka} Abriil 2016

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA SOO GELID
NO: 1824
TR: 23-04-16
SAXIIX:

Guddoonka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

- Markuu arkay:** Mooshinka ku taariikhsan 11.04.2016 oo ay soo gudbiyeen 42 xildhibaan ee Golaha Shacabka oo soo jeediyey: “in la joojiyo dhisidda Maamul Goboleedka Hiiraan iyo Shabeellada Dhexe si muwaaddiniinta labadaas gobol u helaan fursad ay isugu diyaariyaan”;
- Markuu arkay:** Warqadda Lam. OPM/00000.287/04/2016 ee 19/04/2016 Xukuumadda Federaalka Soomaaliya oo Guddoonka ka codsatay in mooshinka la hakiyo oo lala sugo waarbixinta Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaaleynta,
- Markuu arkay:** In xildhibaanadu iyo xukuumadduba isla wada qirsan yihiin in loo baahan yahay in xal loo raadiyo khilafaadka iyo tabashooyinka ay ka qabaan bulshooyinka dhaqameed ee labada gobol ay ka qabaan Xukuumadda;
- Markuu arkay:** In soojeedinta ku xusan faqradda 6-aad ee mooshinku ay xildhibaanadu ku kala aragti duwan yihiin;
- Markuu Arkay:** In Qodobka 61aad ee dastuurku xeerinayo in xildhibaanada qaranka ay u xilsaaran yihiin jirista iyo joogtaynta danta guud ee qaranka iyo in xil gaar ah ka saran yahay daryellidda danaha degaandoorashinka ay kasoo jeedaan;
- Xog Ogaal u ah:** In dhisidda Dawladaha Goboleed ee xubin ka noqonayo Federaalka Soomaaliya yahay waajib Qaran oo muwaaddin kastoo Soomaaliyeed u xilsaaran yahay layskuna waafaqsan yahay in waajibkan qarameed loo baahan yahay in si habsami iyo nabad-jeceel ku dheehan loo dhiirrigeliyo xukuumaduna fuliso;
- Arkay:** In khilaafaadka Geeddisocodka Dhismaha Maamul Goboleedka Hiiraan iyo Shabeellada Dhexe la keenay Kulanka Guud ee Golaha Shacabka lana soo gaarsiiyey Xafiiska Guddoonka Golaha si uu uga talabixiyo xal ka gaarista arrimaha ku xusan Mooshinka;



Hadaba:

Dhinacyada ku kala aragti duwanaa xallinta arrimaha ku xusan mooshinka ay yeeshen kulammo xal raadis ah, oo uu shir-guddoomiyey Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka, ka dib markii ay si qottadheer oo bisayl siyaasadeed, asluub xildhibaannimo iyo walaaltinimo ku dheehan uga doodeen, waxay isla oggolaadeen kuna heshiyeen qodobbada soo socda:

1. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Xildhibaanada Golaha Shacabka ee ka soo jeeda deegaan-doorashooyinka labada Gobol oo iskaashanaya waxaa la farayaa in ay si degdeg ah oo muddo 45 (shan iyo affartan) beri gudahood ah wadajir ugu hawlgalaan kuna soo afjaraan qodobbada soo socda:
 - a. Khilaafaadka ka dhexjira Duubabka iyo Xukuumadda xalna uga gaaraan cabashooyinka iyo tabashooyinka ay qabaan bulshooyin-dhaqameedka ee Gobollada Hiiraan iyo Shabeellada Dhexe;
 - b. Xareynta Ergooyinka oo u igman ansixinta Dastuur-goboleedka;
 - c. Xulidda xubnaha Golaha Sharcidejinta Maamul Goboleedka iyo Doorashada Guddoonka Baarlamaan-goboleedka;
 - d. Doorashada Madaxweynaha Maamul Goboleedka.
2. Si loo gaaro dhismaha maamul ay u wada dhan yihiin Duubabka iyo bulshooyin-dhaqameedka labada gobol, waxaa Xukuumadda la farayaa in shirweynaha iyo gogosha ka furan Jowhar u howlgeliso si waafaqsan habraaca ku xusan faqradda (1) ee heshiiskan, kana fogaato soo saarid dhismo maamul Goboleed aan loo marin habraacaas;
3. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalaynta waxaa la faraya in warbixin laba toddobadle ah kuna saabsan hadba meesha xaaladda marayso uu usoo gudbiyaa Guddoonka Golaha Shacabka si loo socodsiiyo kulamada guud ee Golaha Shacabka;
4. Hubinta hirgelinta heshiiskan waxaa si buuxda uga mas'uul ah Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
5. Guddoonka wuxuu caddeynayaa in Heshiiskan ay xildhibaanadu ku gaareen Xafiiska Guddoomiyaha BFS oo goobjoog ah, wuxuuna dhaqangalyaa ka bilaabato 25/04/2016 ka dib markii Heshiiskan laga hor akhriyo uuna oggolaado kulanka Guud ee Golaha Shacabka.

M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka